Su'aalaha Inta Badan la Waydiiyo ee Joojinta Ka soo bixitaanka Guri ka Saaritaanka Maxay tahay dhab ahaantii tahay Ka soo bixitaanku (offramp)?

"Ka soo bixitaanka guri ka saarida" (“eviction off ramp”) waa sharci ay dhawaan ansixiyeen sharci dejinta Minnesota oo uu saxiixay gudoomiye Walz. Waxay soo afjaraysa amarkii fulinta ee hakiyay ficillada guri ka saarista iyo joojinta heshiiska kirada ee intii uu kacsanaa aaafada cudurka COVID-19. "Ka soo bixitaanka" (“off ramp”) sidoo kale ayaa waxay bilaabaysaa hawsha u ogolaanaysa milkiileyaasha inay joojiyaan heshiiska kirada ama in ay xareeyaan guri ka saaridda.

Waa maxay jadwalka wakhtiga ka soo bixitaanku (off ramp)?

Sharciga waxaa la ansixiyey 29-kii Juun, 2021. Sharcigu wuxuu dhaqan galayaa Juun 30, 2021.

- **Juun 30 -** Milkiileyaashu waxay siin karaan ogaysiisyada joojinta heshiiska kirada ama in ayna u cusboonaysiinaynin heshiiska kirada qoysaska qalab ahaan ugu xadgudbay heshiisyaka (marka laga reebo bixinwaaga kirada). Milkiileyaasha ayaa waxay sidoo kale bilaabi kara howsha ka saaridda kiraystayaasha kirada la daahsan, xaq u leh barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha deg dega ah ee COVID-19, ee laakiin diiday inay codsadaan ama in ay u hogaansamaan nidaamka arjiga.
- **Luulyo 14 12** – Guri ka saarista waxaa loo xarayn karaa qoysaska qalab ahaan ugu xadgudbay heshiiskooda (marka laga reebo bixinwaaga kirada).
- **Ogoosto 13 12** – Milkiileyaashu way joojin karaan heshiiska kiraystayaasha la daahsan kirada ee aan u qalmin barnaamijka gargaarka xaaladaha degdega ah ee COVID-19.
- **Sebtember 12 12** – Milkiileyaashu waxay xarayn karaan guri ka saarista kiraystayaasha la daahsan kirada ee aan u qalmin barnaamijka gargaarka xaaladaha degdega ah ee COVID-19.
- **Oktoobar 12 12** – Dhammaan xayiraadaha saaran joojinta heshiisyada kirada iyo falalka ka saarista guriga ayaa la qaaday marka laga reebo in milkiileyaashu aysan xarayn karin ama aysan sii wadi karin tallaabada ka saarista ee lagu fulinayo qoys haysta arji sugaya oo loo gudbiyey barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19.
- **Juun 1, 2022 12** – Dhammaan xayiraadihii saarnaa tallaabooyinka guri ka saaritaanka ayaa la qaaday.

Waxaan qabaa su'aalo ku saabsan xaaladdayda ii gaarka ah ee ku saabsan guriyaynta iyo sida ay ula xiriirto ka soo bixitaanka (off ramp), yaan wacayaa ama la xiriirayaa?

Waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad la xiriirto khadka taleefanka kireystayaasha ee Home Line (Magaalada iyo nawaxigeeda - 612-728-5767 ama Minnesota Qaybaha Kore 866-866-3546 ama https://homelinemn.org/) ama hay'adda adeegyada sharciga ee deegaankaaga. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah www.LawHelpMN.org.

Waxaan qabaa su'aalo ku saabsan xaq u yeelashada gargaarka kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19, yaan wacaa ama la xiriiraa?

Haddii aad qabto su'aalo ah oo ku saabsan xaq u yeelashada gargaarka kirada xaaladaha degdega ah, waa inaad wacdo 211 ama booqato RentHelpMN.org.

Waa maxay farqiga u dhexeeya joojinta heshiiska kirada iyo guri ka saarida?

Joojinta heshiiska kiradu waa ogaysiis uu milkiiluhu siiyo kiraystaha si uu ugu wargaliyo in kiraysigoodu dhammaanayo. Kama muuqatan doontoo warbixinta baaritaanka kiraystayaasha. Talaabada guri ka saaridu waa talaabo sharci ah oo maxkamadu qaado oo looga baahanyahay kiraystayaasha inay ka baxaan haysashada guriga. Ficilka noocan oo kale ahi wuxuu ku jiri doonaa warbixinta baaritaanka kiraystayaasha iyo diiwaanka faylka ee maxkamada.

Maxay ka dhigan tahay u qalmitaanka barnaamijka kaalmada kirada ee xaaladaha degdega ah ee COVID-19?

Ilaalinta ka bixitaanka (off-ramp) ee loogu talagalay qoysaska haysta "arji sugaya" ayaa waxaa lagu dabaqayaa codsiyada lagu dalbanayo barnaamijyada kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19 ee ay bixiso dowlada dhexe Si ay ugu qalmaan barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19, shuruudaha federaalka ayaa sheegaya qoysku:

- In ay yihiin kirayste Minnesota gudeheeda
- In ay leeyihiin dakhliga reerka oo ka hooseeya 80% dakhliga dhexdhexaadka ah ee agagaarka
- In xubin qoyska ka mid ah uu muujin karo aafada cudurka COVID-19 inay saamayn xun ku yeelatay awooddooda bixinta kirada
- Khatar in ay ugu jiraan xasillooni darro guri ama guri la'aan

Sideen ku ogaanayaa in aan u qalmo caawimada barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19?

Haddii aad buuxiso shuruudaha u qalmitaanka, waxaad u qalmi kartaa gargaar. Waa inaad soo booqato www.RentHelpMN.org ama soo wac 211 si aad u ogaato inaad u qalanto.

Milkiilaha miyaa laga rabaa inuu i siiyo ogaysiis kahor inta uusan xaraynin guri ka saarista?

Laga bilaabo Juun 30, 2021, ilaa la gaaro Oktoobar 12, 2021, milkiiluhu waa inuu bixiyo ogaysiis qoraal ah ugu yaraan 15 maalmood kahor inta uusan xaraynin tallaabada guri ka saarista kirada oo ay bixin waayeen darteed. Ogaysiiskaas waa in lagu caddeeyo in qoyska laga yaabo in lagu qaado tallaabo guri ka saarid ah, in ay liis garayso inta lacag lagu leeyahay, oo ay siiso macluumaadka lagala xiriirayo RentHelpMN.org iyo 211.

Waxaan soo gudbiyay arjiga barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19 laakiin wax jawaab ah la ima siinin. Miyaa la iga saari karaa guriga?

Ilaa la gaaro Juun 1, 2022, milkiiluhu ma xarayn karo ama ma sii wadi karo dacwada guri ka saarista oo la xereeyay ee ku saabsan bixinwaaga kirada guriga ee qoyska haysta arji sugaya oo laga xareeyay barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19. Haddii arjigaagu wali sugayo, waxaa lagaa difaacayaa talaabooyinka guri ka saarista ee bixinwaaga kirada aan la bixin illaa Juun 2022.

Waa maxay arjiga “sugaya”?

Arjiga loogu talagalay barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19 ayaa sugaya haddii la soo gudbiyey oo aan la diidin, laga noqon ama lacag laga bixin.

Waxaan gudbiyay arji laakiin milkiilaha gurigaygu ma uusan soo gudbin wax macluumaad ah ama kama soo jawaabin wax codsi ah. Maxaa samayn karaa?

Haddii milkiiluhu diido inuu ka qaybqaato ama sabab uuna u soo gudbinin macluumaadka loo baahanyahay, lacag bixinta ayaa waxaa si toos loo siin karaa kiraystaha. Waad la soo xiriiri kartaa barnaamijkaaga kaalmada kirada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waxaan helay ogaysiis guri ka saarid ah ama ogaysiiska joojinta heshiiska kirada laakiin uma malaynayo in milkiilaha gurigaygu uu raacay sharciga. Maxaan u baahan nahay inaan sameeyo?

Haddii aad u malaynayso in milkiilaha gurigaagu uusan raacin sharciga, waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad la xiriirto khadka kireystayaasha ee HomeLine (magaalada iyo nawaxigeeda - 612-728-5767; Minnesota Qaybaha Kore - 866-866-3546 ama https://homelinemn.org/ ama a hay'adaha adeegyada sharciga ee deegaanka. Waxaad heli kartaa xafiiska adeegyada sharciga ee deegaankaaga adiga oo soo booqanaya LawHelpMN.org.

Waan la daahsanahay kirada laakiin ma doonayo inaan dalbado kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19. Miyaa la iga saari karaa guriga?

Laga bilaabo Juun 30, 2021, milkiiluhu wuxuu bilaabi karaa nidaamka guri ka saaridda qoysaska xaq u leh kaalmada kirada iyada oo loo marayo barnaamijka kaalmada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19 ee laakiin diida in ay dalbadaan ama diida in ay ka qayb qaataan nidaamka arjiga. Ilaa la gaaro Oktoobar 12, 2021, nidaamkani wuxuu u baahanyahay in milkiilayaashu ay siiyaan qoysaska ogaysiis ugu yaraan 15 maalmood ah kahor inta aysan xaraynin ka saarista guriga kirada oo ay bixin waayeen darteed.

Waxaan ku jiraa heshiis bil ilaa bil ah ama heshiiskayga kiradu wuu dhacayaa inta lagu jiro muddada ka soo bixitaank (off-ramp). Milkiiluhu miyuu go'aansan karaa inuusan cusboonaysiin heshiiska kirada? Markee?

Illaa la gaaro Oktoobar 12, 2021, dhammaan xayiraadaha la xiriira joojinta heshiiska kirada ayaa la qaaday. Milkiilaha go'aansada inuu joojiyo heshiiska kiradu waa inuu raaco sharciyada khuseeya ee la xiriira joojinta heshiiska kirada.

Sideen ku ogaadaa in kiraystahaygu uu u qalmo RentHelpMN ama barnaamij kale oo caawimada kirada xaaladaha degdega ah ee COVID-19?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha u qalmitaanka guud waxaa laga heli karaa RentHelpMN.org ama wicitaanka 211. U qalmitaanka waxaa la go'aamin doonaa inta lagu guda jiro ka shaqaynta arjiga.

Arjigayga waa ladiiday sababtoo ah waxaa la ii sheegay in aanan u qalmin dakhliga awgii. Hadda shaqadii way iga dhamaatay Dib miyaaan usoo codsan karaa?

Dib waad u soo dalban kartaa haddii duruufahaagu is beddeleen oo aad u malaynayso inaad hadda xaq u leedahay. Waad codsan kartaa dhammaan kaalmooyinka aad u baahantahay laga soo bilaabo Maarso 13, 2020, illaa ugu badnaan 18 bilood, xitaa haddii aadan dakhli ahaan u qalmin muddadaas.